

## KU MEEL GAAR: BILAWGA FIICAN EE DUGSIGA

Tusayaasha lagu caawimayo qoysaska si ay u dhameeyaan Caddaynta Ku-meelgaarka ah iyo Caddaynta Horumarka

### WAA MAXAY SABABTA BILOWGA FIICAN MUHIIM UGU YAHAY DUGSIGA?

Bilaw fiican oo dugsi wuxuu kuu hogaamiyaa waxbarasho wanaagsan iyo natiijoyinka wanaagsan ilmahaaga. Iyada:

- ka fogaanshaha carqaladaha waxbarashadooda iyo horumarka
- waxay ka caawintaa ilmahaaga inuu dareemo amaan, kalsooni iyo ku xirnaansho
- waxay kor u qaadaa adkaysiga.

### WAA MAXAY WAXBARASHADA KU MEEL GAARKA AH IYO CADDAYNTA HORUMARKU?

Waxbarashada Gudbida iyo Bayaanka Horumarka (loo uyaqaan Caddaynta Gudbinta) waxaa loo dhigaa ilma walba markay ka gudbayaan Adeega ilmanimada ee dugsi. Bayaanka Gudbinta waxay sahashaa in lala wadaago macluumaad ka dhexeeya adeegyada, waalidiinta, dugsiyada iyo qoysaska.

Bayaanka Gudbida ilmaha waxaa ku jiri doona:

- ilmahaaga magaciisa, taariikhda dhalashada iyo sawir
- magacaaga iyo faahfaahinta qofka lala xiriirayo
- magaca iyo faahfaahinta qofka lala xiriirayo oo ilmanimada hore iyo mihnadlayaal kasta oo ilmanimada hore kuwaas oo caawimaya ilmahaaga.
- macluumaad ku saabsan waxa ilmahaagu xiisaynayo, xirfadaha iyo awoodaha
- istaraatiijiyada waxbarida ee lagu kaalmeeyo waxbarashada ilmahaaga.

Macluumaadkaani wuxuu caawimaa macalinka ilmahaaga ee bareebka si uu u ogaado ilmahaaga una qorsheeyo waxbarashadooda. Bayaanka gudbida ayaa iyaduna

caawimi kara inaad fahamto, kaalmayso kalana hadasho waxbarashada ilmahaaga markay dugsi bilaabaan.

Haddii ilmahaagu aadi doono Banaanka Saacadaha Daryeelka Dugsiga (OSHC), Adeega OSHC waxaa la siin doonaa koobiga Bayaanka Gudbida.

Bayaanka Gudbida Ilmahaagu waa caawimayyaa:

- Qorshay waxa ilmahaagu xiisaynayo
- kaalmay ugu soo gudbida dugsi si aan turxaanta lahayn adeega ilmahaaga ee ilmanimada hore.

### CADDAYNTA TALADAADA EE GUDBIDA

Waad caawimi kartaa ilmahaaga inuu yeesho bilaw wanaagsan oo dugsi iyada oo aad door ka qaadanayso Caddaynta Gudbida.

Caddaynta Gudbida waxay leedahay qaybo dad kale duwani inay buuxiyaan.

**Qaybaha 1 iyo 1.1** waxaa buuxiyey ilmahaaga barahiisa ilmanimada hore.

**Qaybta 1.2** waxaa laga yaabaa inay buuxiyaan baraha ilmanimada hore ee ilmaha haddii ilmahaagu leeyahay daahida koritaanka ama iin. Mihnadlayaasha ilmanimada hore ee ilmaha kaas oo kaalmeeya ilmahaaga ayaa laga yaabaa in uu door ka qaato.

**Qaybta 2: Ilmaha** waxaa buuxiyey ilmahaaga, iyada oo caawima laga hellayo qof qaangaar ah oo la yaqaan ama baraha ilmanimada hore.

**Qaybta 3: Qoyska** adiga ayaa buuxinaya. Waxay weydiisaa wixii ku saabsan aragtidaada muhiimka ah:

- Waxa ilmahaagu xiisaynayo
- Rajooyinkaaga, rabitaankaaga iyo hadafyada ilmahaaga ee dugsi.

Macluumaadkaani wuxuu caawimi karaa ilmahaaga macalinka (barahooda OSHC, haddii ay hasyaan mid) kula xiriira adiga iyo ilmahaaga wuxuuna caawimaa ilmahaaga barashadiisa iyo horumarka.

### MAXAA DHACAYA OO KU XIGA?

Soo celi qaybtaada 3 aad (iyo Qaybta 2, haddii aad ka caawintay ilmahaaga) baraha ilmanimada hore ee ilmahaaga.

Waxay isku dari doonaan dhamaan qaybaha Caddaynta Gudbinta waxayna siin doonaan koobi:

- adiga
- ilmahaaga dugsigiisa
- Ilmahaaga adeegiisa OSHC, haddii ay mid leeyihiin.

Haddii aadan dooran weli dugsi, waxaa lagu siin doonaa koobi labaad oo ah Caddaynta Gudbinta. Koobigaan waxaad siin kartaa dugsiga markaad ilmahaaga ku qorto.

Haddii aadan soo celin Qaybta 3aad, baraha ilmanimda hore ayaa weli kula wadaagaya inta ka harsan qaybta la buuxiyey ee Caddaynta Gudbinta oo aad hayso, ilmahaaga dugsigiisa iyo adeega OSHC, haddii ay haystaan mid.

La wadaagida macluumaadka Caddaynta Gudbinta waxay caawintaa ilmaha ugu gudbinta dugsiga si guul leh. Si kasta ha ahaatee, haddii aadan doonayn Caddaynta Gudbinta lala wadaagay ilmahaaga dugsigiisa, fadlan la hadal baraha ilmanimada hore.

Marmarka qaarkood waxbarashada Fiktooriya iyo mihnadlayaasha daryeelku waxay u baahan yihiin inay la wadaagaan macluumaad si loo xafido samaqabka ilmaha ama amaanka. Waxbarashadaada ilmanimada hore ee adeega ayaa laga hore yaabaa inay la wadaagaan macluumaad ku saabsan ilmahaaga iyo qoyska markii ay lagama maarmaan tahay si wax looga qabto waajibaadka daryeelka, lidka-takoorida, caafimaadka mihnadeed iyo samaqabka ilmaha iyo waajibaadka amaanka.

Macluumaad intaas ka badan, booqo

<https://www.vic.gov.au/information-sharing-schemes-and-the-maram-framework>

### **MACLUUMAAD INTAAS KA BADAN**

Fadlan booqo [www.education.vic.gov.au/transitiontoschool](http://www.education.vic.gov.au/transitiontoschool)

Dukumintigaan waxaa lagu helli karaa luqada badan

[www.education.vic.gov.au/transitiontoschool](http://www.education.vic.gov.au/transitiontoschool).